



Caafimaadka Afka ee Carruurta

Caadooyinka aasaasiga ah ayaa fure u ah ilko caafimaad qaba!



Waxa aad samayso

Aasaasyo xooggan ayaa lagama maarmaan u ah nolol caafimaad af oo wanaagsan. Ka caawi ilmahaaga inuu cadaydo oo uu qashinka ka guro ilkaha maalin kasta ilaa ay ka baranayaan iyagu. Ku dhiirigeli ilmahaaga inuu xidho ilaalayaha afka inta lagu jiro hawlaha is-dhexgalka, oo xusuusnow in carruurta u janjeerto inay raacaan tusaale: Markaa iska hubi inaad dib u-xoojiso hab-dhaqanka togan adiga oo tusaale u noqonaya!



Waxa aad cunto

Cuntooyinka nafaqada leh maaha kaliya kuwo loogu talagalay caafimaadka jidhka ee korriinka carruurta, laakiin sidoo kale waxa loogu talagalay ilkahooda. Taas macnaheedu waa in waalidiintu mudnaanta siiyaan caadooyinka cuntada caafimaadka leh. Cuntooyinka iyo cabitaannada ay sonkorta ku yar tahay ayaa gacan ka gaysta ka hortagga daloolada-ilkaha ee carruurnimada. Ku dhiirigeli ilmahaaga inuu cabbo biyaha qasabadda ee fluoride-ka leh halkii uu ka cabbi lahaa soodhaha, casiirka ama cabitaannada kale ee sonkorta leh.



Daryeelka ka-hortagga

Daryeelka ka hortagga ayaa muhiim u ah ilaalinta af caafimaad qaba. Booqashada joogtada ah ee dhakhtarka ilkaha ee carruurta inta badan waxaa ka mid ah daryeelka ka-hortagga, sida dahaadhka ka-hortagga suuska ilkaha iyo daaweynta fluoride-ka, kuwaas oo ka ilaaliya ilkaha carruurta suuska ilkaha iyo daloolada. Inta badan daryeelka ka-hortagga waxaa daboolaa qorshayaal badan oo ah caymiska aasaasiga ah ee ilkaha.



Goorma ayay tahay inaad rajayso in ilmahaaga ilkuhu usoo baxaan?

4-7 bilood, ilkuhu waxay bilaabi doonaan inay dilaacaan. Markay da'du gaarto 3, 20 ilkood oo buuxa ayaa meesha ku jiri doona. Sawirka bidix waxa uu tilmaamayaa sida ay u kala horreeyaan ilkaha caruurta ee sida caadiga ah u soo baxaan.



The Power of Smile™

Xog dheeraad ah ka baro qaabka caafimaadka afkaaguugu ugu xiran yahay caafimaadkaaga guud ahaaneed adigoo adeegsanaya: Blog.DeltaDentalMN.org